



Mashruuca Gargaarka Macmilka

Client Assistance Project (CAP)

Waa maxay Barnaamijka Gargaarka macmilku (CAP)?

Mashruuca Gargaarka Macmilku (CAP) waa barnaamij gobolka oo dhan ka jira oo caawiya dadka naafada ah ee Minnesotaanka ah ee dhibaatooyinku ka haystaan nidaamyada tababarada xirfadaha. Hay'ada CAP taakuleeyeyaashoodu waa ay ku caawin karaan hadii aad codsanayso adeegyo ama hadii aad jaa horey u ahayd macmilba.

Waa ka jira Minnesota 2 barnaamij oo tababarada xirfadaha ah oo ka caawiya dadka naafada ah helida, ama sii wadida shaqo.

- **Barnaamijka Adeegyada Tababarada Xirfadaha (VRS)** wuxuu u adeegaa dadka jir ahaan/miyir ahaan naafada u ah.
- **Barnaamijka Adeegyada Gobolka ee Indhoo-layaasha (SSB)** wuxuu u adeegaa dadka indhaha la' ama sida fiican aan wax u arag.



Sidee ayuu (CAP) wax u Caawisaa?

Wac CAP hadii aad qabto su'aalo, walaac ama ashtako ku saabsan adeegyadaada tababarka xirfadaha. CAP **ma bixiso** adeegyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab.

Taakuleeye CAP ayaa kuu sheegi kara xaquuqdaada uu dhigayo sharciga Naafadu (Rehabilitation Act) iyo wixii adeegyo ah ee aad heli karto adigu. Taakuleeye CAP sidoo kale waxaa dhici **KARTA** inuu awoodo inuu:

- kaa caawiyo helida adeegyada tababarka xirfadaha ee aad u baahan tahay
- qoraal ahaan kuugula taliyo ama bedelo Qorshaha Shakhsiyanka ah ee Shaqada (Individualized Plan for Employment (IPE)
- dib u eego go'aanka hadii lagu diido adeegyo
- talo kaa siiyo ama kaa caawiyo helida xalal hadii aadan ogolayn go'aanka ay gaareen hay'adaha VRS ama SSB

Xiriir CAP

CAP waxa ay qayb ka tahay Xarunta Sharciyada Dadka Naafadda ee MN [MN Disability Law Center (MDLC)]. Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan CAP ama sida loo codsado adeegyada CAP, ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)

Waxa aanu joognaa: Minnesota Disability Law Center
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403


<https://mylegalaid.org/disability-law-center/>

Xaquuqdaadda Aasaasiga ah ee uu dhigayo Sharciga Naafadu (*Rehabilitation Act*)

Waxaa telefanka nagu soo waca dad badan oo na waysiinaya, “Waa maxay xaquuqdaydu?” qof walba kiiskiisu waa ka duwan yahay ka dadka kale. Waxaa fiican inaad soo wacdo xafiiskayaga si aad uga hesho jawaabo quseeya su’aalo cayiman. Waxa aanu kaala hadli karnaa xaaladaada, waxaana dib u eegi karnaa galkaaga VRS ama SSB, waxaana la hadli karnaa la taliyahaaga VRS ama SSB ama cidii kale ee haysa akhbaar muhiim ku ah kiiskaaga.

Waxaa jira xaquuq guud oo aasaasi ah. Maadaama aad tahay codsade ama macmil barnaamijyada VRS ama SSB, waxa aad xaq u leedahay:

- inaad codsato adeegyo
- in lagu qiimeeyo si loo eego inaad xaq u leedahay adeegyada
- inaad aragto inta badan akhbaarta ku jira galka kiiskaaga ee VRS ama SSB (waxaad u baahan kartaa inaad saxiixdo foomka bixinta akhbaarta mar hore)
- in xogta galkaaga VRS ama SSB ay xafidnaato
- qorid Qorshaha Shakhsiyanka ah ee Shaqada (Individualized Plan for Employment (IPE))
- oo ku haboon baahidaada
- racfaan aad ka qaadato go’aan hadii aadan ogolayn go’aanka ama hadii aad dareensan tahay in xaquuqda lagu tuntay



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.